



Qaabka Ay Waalidiinta U galayaan Barta Internetka Ah Ee Schoolology:

Waalidiinta oo laga qeyb-galiyaa waxbarashada ilmahooda ayaa sababtaa in ay ardayda guul ka gaaraan



waxbarashada. Waad ku mahadsantahay in aad furatay akoonkaan! Adeega Schoolology wuxuu ardayda iyo waalidiintuba u sahlayaa in ay la socdaan dhacdooyinka, macluumaadka, manhajka waxbarsho iyo waxyaabaha kale ee ku saabsan waxbarashada ee heerka fasallada K-12-aad.

Macluumaadka Manhajka ku saabsan ee ku daabacan Adeega Schoolology waxaa ka mid ah: Kalendariyadda ama jadwalka Koorsooyinka, Ogaysiimaha, Dokumeentiyada kale, Shaqada ardayga laga rabo in uu qabto iyo natiijooyinka imitixaanaadka.

Macluumaadka ardayda ku saabsan ee ku jira barta Campus Portal waxaa ka mid ah: Jadwalka, Buundooyinka, Maqnaanshaha ardayga, adeegyada cunnada, Macluumaadka caafimaadka, furaha lagu galo adeega/barta Schoolology.


Si aad u samaysatid akoon cusub oo adeega/barta Schoolology waxaad marka hore tagtaa barta www.schoolology.com ka dibna riix badhanka Sign Up ee Menu-ga sare ku jira (ama sidoo kale gal barta www.schoolology.com/register)

1. Guji badhanka Parent
2. Gali lambarka furaha kuu ah. Lambarkani waxaa laga heli karaa barta Campus



3. Markaad dib ugu soo laabatid barta Schoology oo aad galisid lambarka furaha kuu ah, dhamaystir qeybta hartay ee macluumaadka diiwaan-galinta.

4. Guji badhanka Register si aad u dhamaystirtid



Hadii aad isticmaashid furaha waalidiinta ee Parent Access Code si aad u samaysid akoon, waxaa toos laguugu xirayaa ardayga. Hadii ay caruur badan kuu dhigato iskuullada kala duwan ee Eden Prairie, dhamaantood waxaa kugu xiraya halka fure ee Parent Access Code. Markii aad gashid akoonkaada, waxaad arkaysaa badhan

dhanka midig ku yaal oo ay ku qoran tahay "add child." Guji badhankaan, kadibna gali furayaasha/ access codes caruurtaada kale. System-ka wuu isku kiiin xirayaa adiga iyo caruurtaada hadii ay kuligood wada dhigtaan iskuullada Eden Prairie.

❖ **Hadii aad u baahan tahay faahfaahin dheeraad ah booqo barta:**

<http://bit.ly/schoologyparentep> ama wac telefoonka lambarkiisu yahay 952-975-7094 si lagu caawiyo.